



Lacag yar ku bixi kharashkaaga tamarta

Iyadoo la adeegsanayo barnaamijka PGE ee Dakhliga U Qalma Kharashka Qiimo Dhimista

Barnaamijkeena Income-Qualified Bill Discount (Dakhliga U Qalma Kharashka Qiimo Dhimista) waa hab wayn oo lagu helo qiimo dhimis bille ah oo u dhaxaysa 15% iyo qiimo dhimis 80% ah ee isticmaalkaaga tamarta* oo waa ay sahlan tahay in la codsado!

1. Kaalmada kharashka socdo, ee billaha ah

Qiimo dhimistaan socoto, ee billaha ah waxa ay dheeraad ka tahay wixi kaalmo kasta ee kale ee laga yaabo inaad anaga naga helayso ama hay'adaha kale.

2. Waxaaba laga yaabaa inaadba durbaba uqalantay

Iyadoo ay ku xiran tahay inta uu qoyskaaga la'eg yahay iyo dakhligaaga sanadlaha ah, qiimo dhimistaada kharashka ah waxa ay u dhaxeyn kartaa 15% iyo 80%. Dhammaan midda ugu fiiican, haddii aad horay u qaadatay kaalmada tamarta, waxaaba laga yaabaa inaadba durbaba uqalantay.

3. Isdiwaangelin sahlan

Kaagama baahnaan doono adiga wax dukumiintiyiyo lacageed ah si aad usoo codsato. Waxaan kaliya ubaahnaan doonaa inaan ogaano inta uu la'eg yahay qoyskaaga iyo celceliska dakhliga sanadlaha guud ee qoyskaaga.

4. Waa ay sahlan tahay in la codsado

La Taliyaasheena Adeegga Macaamiishu waxay kugu caawin karaan in ka badan 200 oo luuqadood. Kaliya naga soo wac [503-228-6322](tel:503-228-6322) oo waan kuula dhex mari doonnaa. Ama buuxi foom fudud iyo middood boosto inoogu soodir ama soogeli codsiga portlandgeneral.com/formupload (ka eeg tilmaamaha foomka codsiga).

Ma uqalantaa? Aan bal soo ogaano!

Isdiwaangelinta waxaa heli kara macaamiisha deegaanka ee u qalma ee PGE. Uqalmitaanka waxaa lagu saleeyaa inta uu la'eg yahay qoyska iyo wadarta guud ee celceliska dakhliga sanadlaha ee guud ee dhammaan xubnaha katirsan qoyskaaga ee jira da'aha 18 sano iyo kuwa kasii wayn. Dakhligaaga guud micnaheeda waxay tahay dakhliga qoyskaaga kahor canshuurta.

Waxaa hoos ku qoran habraacyada lagu kala soocay inta uu la'eg yahay qoyska iyo dakhliga.

Inta uu la'eg yahay qoyska	Dakhliga guud ee bilaha ah*	Celceliska dakhliga sanadlaha guud ee qoyska*
1	\$3,198.75	\$38,385
2	\$4,183.00	\$50,196
3	\$5,167.17	\$62,006
4	\$6,151.42	\$73,817
5	\$7,135.58	\$85,627
6	\$8,119.83	\$97,438
7	\$8,304.33	\$99,652
8	\$8,488.92	\$101,867
9	\$8,673.42	\$104,081
10	\$8,858.00	\$106,296
11	\$9,042.50	\$108,510
12	\$9,227.08	\$110,725
Xubin kasta oo dheeraad ah	\$184.58	\$2,215

*Dakhligaaga guud waxaa loola jeedaa guud ahaan dakhliga qoyska.

Tirooyinka waxay ku saleysan yihiin dakhliga guud ee sanadlaha ee qoyska ee jooga ama ka hooseeya 60% ee Dakhliga Dhexdhexaadka ah ee Gobolka (SMI) laga bilaabo Oktoobar 2025. Tilmaamaha waxaa loo cusboonaysiiyaa si sanadle ah.

Haddii aad su'aalo ah qabto oo kusaabsan xisaabinta dakhligaaga, shuruudaha looga baahan yahay barnaamijka, ama aad ubaahan tahay in lagaa caawiyo soo codsashada, naga soo wac 503-228-6322. Waxaan diyaar u nahay inaan ku caawino.

Su'aalaha inta badan la isweydiiyo

Waxaad kaheli doontaa macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan barnaamijka portlandgeneral.com/pgediscout (ku qoran Af-Ingiriisi). La Taliyaasheena Adeegga Macaamiishu waxay kaaga caawin karaan in ka badan 200 oo luuqadood halkaan [503-228-6322](tel:503-228-6322).

Maxay PGE ku sameysaa dakhligeyga iyo macluumaadka qoyskeyga?

- Macluumaadkaaga waa lagu xafiday. Waxaan kaliya u isticmaalnaa dakhligaaga iyo macluumaadka qoyskaaga inaan ku xaqiijino inaad uqalanto barnaamijka.

Maxaa dhacaaya haddii inta uu la'eg yahay qoyskeyga ama dakhligeyga isbadalo?

- Haddii inta uu la'eg yahay qoyskaaga ama dakhligaaga isbadalo, waxaad ubaahnaa doontaa inaad foom cusub kusoo gudbisoo boosto, ama oonleen ahaan aad usoo geliso ama aad nasoo wacdo adigoo hayo macluumaadkaaga la cusbooneysiyeey.

Miyuu barnaamijka Dakhliga U Qalma Kharashka Qiimo Dhimista saameyn doonaa awoodeyda aan ku helayo kaalmada tamarta?

- Maya. Barnaamijyadu waa ay kala duwan yihiin oo helitaanka kaalmada tamarta ma saameyneyso awoodaada aad iska diiwaangelineyso qiimo dhimista biilka ee PGE. Marka aad iska diiwaangeliso barnaamijka qiimo dhimista, waxaad wali awood u leedahay inaad codsato oo aad hesho kaalmada tamarta.

Maxaan filan karaa kadib isdiwaangelinta?

- Marka aad foomkaaga ku gudbisoo boosto, ama oonleen, ama aad nasoo wacdo si aad isku diiwaangeliso, waxaan dib u eegis ku sameyn doonaa macluumaadkaaga si aan u eegno inaad barnaamijka u qalanto. Fadlan ogolow 30 maalmood in codsigaada lagu baroseesgareeyo.
- Marka lagu aqbalo, waxaan kuugu soo diri doonaa iimeel ama warqad si aan kuugu xaqiijino isdiwaangelintaada iyo qiimo dhimista boqolkiiba inta aad heli doonto.



- Si sanadle ah, waxaan weydiin doonaa tiro yar oo kamid ah macaamiisha diiwaangashan inay keenaan caddeynta inta uu la'eg yahay qoyska iyo dakhliga si loo hubiyo macaamiisha uqalma.

Haddii aan uqalmo, maxaa kale oo ay tahay inaan ka ogaado barnaamijka?

- Marka aad isdiiwaangeliso, qiimo dhimista billaha ah waxay sii jiri doontaa muddo labo sano ah. Waxaad ubaahnaa doontaa inaad dib-isudiiwaangeliso labo sano kadib, laakiin waxaan kuusoo diri doonaa xusuusin. Qiimo dhimistu kaliya waxay khuseysaa kharashyada cusub ee lagugu soo dallaco kadib isdiiwaangelinta. Qiimo dhimistu ma khuseyso kharashyada lagugu soo dallad cay kahor isdiiwaangelinta.
- Qiimo dhimistu waxaa lagu dabaqi doonaa kharashka u horreeya ee aad hesho kadib marka isdiiwaangelintaada la aqbal.
- Qiimo dhimistani ma khuseyso wadarta lacagta guud ee bishiiba lagaa rabo. Kharashaadaadka qaarkood laguma soo daro qiimo dhimista.

Waa maxay waxa loo tixgeliyo dakhli ama aanan loo tixgelin dakhli?

- Ka hubi shaxda hoose tusaalooyinka guud ee waxa loo tixgeliyo dakhli ama aanan loo tixgelin dakhli.

Kuwaan waxaa loo tixgeliyaa dakhli

- Lacagta masruufka ee maxkamadu xukuntay
- Lacagta macaashka ee kuusoo go'do
- Lacagta la isku siiyo taageerada carruurta
- Saamiyada
- Lacagta joornaatiga/mushaarka
- Lacagta la isku siiyo korinta ilmaha aadan dhalin
- Lacagta ciidanka
- Lacagta la siiyo dadka hawlgabka ah
- Lacagta kasoo xaroota xuquuqda waxaad qortay ama aliftay
- Dakhliga iskaa aad ushaqeysatay (kadib marka laga bixiyo kharashyada ku baxay)
- Social Security (Amniga Bulshada)
- Social Security Disability (SSDI, Dakhliga Naafonimada Badbaadada Bulshada)
- Supplemental Security Income (SSI, Dakhliga Badbaadada Kabitaanka ah)
- Kaalmada Ku Meel Gaarka ah ee Qoysaska Baahan
- Shaqo la'aanta

Kuwaan loomu tixgeliyo dakhli

- Kaalmada Tamarta
- Dakhliga lasiiyo dadka dugsigu sare dhigto ama kayar 18 sano
- Dakhliga soocelinta canshuurta/kiridhityada
- Hadiyadaha kaashka halka mar ah
- Lacag amaah kubadalashada guryaha ee milkiilayaasha
- Qeybta 8 aad ama kabista guriyeynta
- Gunnada adeegyada guryaha
- Gunnooyinka barnaamijka Women, Infants, and Children (WIC, Haweenka, Dhallaanka, iyo Carruurta)



Kheyraad kaa caawinaya maaraynta biilkaaga

Waxaan fahamsannahay in bixinta biilka tamartaadu mararka qaar noqon karto mid caqabado leh. Iyadoo ay ku xiran tahay waxa aad u baahan tahay, waxaa jira aalado iyo barnaamijyo kala duwan oo caawimaad ku siin kara. Si aad wax badan uga ogaato kheyraadka hoos ku qoran, booqo portlandgeneral.com/manage-my-bill. Wixii caawimaad ah, naga soo wac [503-228-6322](tel:503-228-6322).

Qabanqaabooyinka lacag-bixinta dabacsan iyo kordhinada

Haddii aad u baahan tahay wakhti dheeraad ah ama qorshe la maarayn karo, waxaan halkaan u joognaa inaan kaala shaqayno. Waxaad codsan kartaa nidaamka lacag bixinta ama kordhinta wakhti kasta adigoo galaya akoonkaaga onlaynka ah ama adiga oo isticmaalayo nidaamkeena teleefoonka ee ootomaatiga ah.

Equal Pay (Lacag-bixin Is-le'eg)

Ka dhigo miisaaniyadda bil-laha ah mid fudud adigoo bil walba bixinaya cadad isku mid ah.

Wakhtiga uu ku egyahay ee la doorbidayo

Dooro taariikhda biilku ku egyahay ee adiga kugu haboon.

Barnaamijka Medical Certificate (Barnaamijka Shahaadada Caafimaadka)

Haddii uu jiro qof gurigaaga ku nool oo korontada ugu tiirsan baahiyo caafimaad, waxaad uqalmi kartaa caawimaad gaar ah. Kooxdeena ayaa kaa caawin karta sidii aad ugu diyaargarooobi lahayd go'ista korontada, inaad koronto hesho inta ay korontadu maqan tahay iyo inaad diyaarsato ikhtiyaaro biil-bixin iyo lacag-bixin oo dabacsan sannadka oo dhan.

Dhowrista macaamiisha

Si aad u aragto liiska dhowrista macaamiisha oo dhamaystiran, fadlan booqo portlandgeneral.com/customerprotections.

Barnaamijyada kaalmada tamarta

Haddii aad ku dhiban tahay bixinta biilkaaga, garaac 211 si aad wax badan uga ogaato kheyraadka aad heli karto.

Weatherization Assistance (Kaalmada Ka Difaacnaanta Cimilada)

Waxaad heli kartaa caawimaad bilaash ah adigoo gelinaya kulayl celiyeyaal, sharaya duleelada hawadu ka baxdo ama hagaajinaya nidaamkaaga kululaynta si aad u yarayso kharashka kaaga baxaya tamarta sarena ugu qaadaya qanaacadaada.

Marka laga yimaado barnaamijka Income-Qualified Bill Discount ee PGE, waxaad sidoo kale u qalmi kartaa caawimaad ka socoto NW Natural, Pacific Power ama Xfinity.

Wax badan ka ogoow barta nwnatural.com/billdiscount, pacificpower.net/LID ama xfinity.com/internetessentials.





Codsiga Dakhliga U Qalma Kharashka Qiimo Dhimista

U isticmaal foomkaan codsigaada koowaad ama si aad ugu cusbooneysiiso macluumaadkaaga haddii qoyskaaga inta uu la'eg yahay ama dakhligaagu isbadalo.

Magaca koowaad iyo kan udambeeya

(magaca koowaad ee kuugu qoran kharashkaaga PGE)

Lambarka akoonkaaga PGE (ka kooban 10 lambar)

Ciwaanka adeegga (meesha aad dagan tahay)

Ciwaanka iimeelka

Taleefan lambarka la doorbidayo

Luuqada la doorbidayo

La Taliyaasheena Adeegga Macaamiishu waxay kugu caawin karaan in ka badan 200 oo luuqadood. Sidoo kale waad soo codsan kartaa adigoo naga soo wacaya [503-228-6322](tel:503-228-6322).

Ma jiraa qof katirsan qoyskaaga oo qabo baahiyo caafimaad oo ubaahanaya koronto?

Haddii aadan horay isku diiwaangelin, waan kuula raaceynaa si aan kuula wadaagno macluumaadkeena kusaabsan [barnaamijka Medical Certificate](#) (Ku qoran Ingiriis).

Haa

Maya

Qoyska iyo macluumaadka kusaabsan dakhliga

Qiimo dhimistaadu waxa ay ku xirnaan doontaa inta uu la'eg yahay qoyskaaga iyo celceliska dakhliga sanadlaha guud ee soogala qoyskaaga (inta aan canshuurta laga bixin).

\$

Inta uu la'eg yahay qoyskaaga

(dhammaan xubnaha oo ay kujiraan kuwa waaweyn iyo carruurta)

Celceliska dakhliga sanadlaha guud ee soogala qoyskeyga

Waxaan hadda qaataa dakhli go'an oo waxaan ka helaa dakhliga ama gunnooyinka mid kamid ah ama ka badan kuwa soo socda: Badbaadada Bulshada, State Supplemental Program (SSP, Barnaamijka Kaalmada Dheeraadka ah ee Gobalka) ama Social Security Disability (SSDI, Dakhliga Naafonimada Badbaadada Bulshada), dulsaarka/saamiyada ka yimaada akoonada hawlgabka, Medicaid ama Supplemental Security Income (SSI, Dakhliga Badbaadada Kabitaanka ah).

Ma ubaahan tahay in laga caawiyo xisaabinta dakhligaaga?

Ka hel talooyin bogga soo socdo.



Iskaan garee sawirka koodhka QR-ka si aad u hesho nooca dhijitaalka ah ee codsigan.

Sida loo xisaabiyo dakhliga qoyskaaga ee sanadlaha ah

Shaqaalaha ku shaqeyaa saacadiiba, soo qaado lacagta aad ku qaadato saacadiiba oo ku dhufo taas celceliska saacadaha la shaqeyo toddobaadkiiba. Kadib kudhufo tiradaas 52 (oo ah inta asbuuc ee kujirta sanadkiiba) si aad u hesho dakhliga sanadlaha guud ee kusoo gala (inta aan canshuurta laga bixin).

Haddii ay dhacdo in dakhliga soogala qoyskaaga uu isbadbadelo bilka-bil, soo qaado dakhligaada la isu geeyey bishi lasoo dhaafay oona ku dhufo 12 si aad u xisaabiso celceliska dakhliga sanadlaha guud ee qoyskaaga.

Haddii aad wax su'aalo ah qabto oo kusaabsan xisaabinta dakhligaaga, shuruudaha looga baahan yahay barnaamijka, ama aad ubaahan tahay in lagaa caawiyo soo codsashada, naga soo wac [503-228-6322](tel:503-228-6322). Waxaan diyaar u nahay inaan ku caawino.

Caddeynta

- Waxaan garawsanahay in kani uu yahay codsi billoow ah iyo in PGE ay iga daba keeni doonto kadib isdiiwaangelinteyda rasmiga ah faahfaahinta kusaabsan qiimo dhimisteyda.
- Waxaan ku wargelin doonaa PGE haddii celceliska dakhliga sanadlaha ee guud inta uu la'eg yahay qoyskeygu isbadelo anigoo codsi cusub kusoo gudbinayo oonleena ama anigoo PGE kasoo wacayo 503-228-6322 si markaa macluumaadkeyga loo cusbooneysiyo.
- Waxaan garawsanahay in la iga baahan karo inaan keeno cadeynta dakhliga soogala qoyska iyo inta uu la'eg yahay qoyska hadii la iweydiyo. Macluumaadka waxaa la siin doonaa PGE iyo shakhsiyadka ama ciddi ka shaqeyneysa iyagoo wakiil ka ah PGE si ay u hirgeliyaan barnaamijkaan.
- Waxaan garawsanahay in qiimo dhimistaan aysan khusayn doonin kharashaadaadkeygi hore, laakiin kaliya kharashyada cusub ee la igu soo dallaco kadib isdiiwaangelinta (isdiiwaangelintu waxay qaadan kartaa ilaa 30 maalmood) iyo inaysan ahayn lacagta wadarta guud ee laga rabo biilka. Kharashaadaadka qaarkood laguma soo daro qiimo dhimistaan.

Anigoo saxiixaayo caddeyntaan, waxaan cadeynayaa in macluumaadka aan ku bixiyey codsigaan dhexdiisa ay yihiin kuwo run iyo sax ah. Waxaan qirayaa inaan akhriyey oo aan fahmay macluumaadka kujira codsigaan. Waxaan sidoo kale aqbalayaa xeerarka iyo shuruudaha lagu cayimay Canshuurta PGE ee Dakhliga U Qalma Kharashka Qiimo Dhimista portlandgeneral.com/iqbdtariff.

Saxiixa elektarooniga ah

(fadlan geli magacaada oo dhammeystiran)

Diyaar ma u tahay inaad gudbiso?

Soogeli codsiga aad dhammeystirtay portlandgeneral.com/formupload ama boosto ugu dir **PGE Bill Discount, 7895 SW Mohawk St., Tualatin, OR 97062.**

Tusaale:

$\$13.50$ (qiimaha saacadiiba)
 $\times 40$ (celceliska saacadaha la shaqeyo toddobaadkiiba)

$= \$540$ (dakhliga todobaadlaha ah)



$\$540$

$\times 52$ (oo ah inta asbuuc ee kujirta sanadkiiba)

$= \$28,080$

(tani waxa ay noqoneysaa dakhligaaga sanadlaha ee guud)

Xogta dadka

Su'aalahaan soo socda waa ikhtiyaari mana loo isticmaalo u qalmitaanka laakiin waxaan ku hubin doonaa inaan macaamiisheena ugu adeegeyno si siman. Kuwaan soo socda keebaa sida ugu wanaagsan kuu qeexaya?

- Soogalootiga Afrikaanka ah ama Qaxooti
- Eeshiyaan ama India Eeshiya
- Madow ama Afrikaan Ameerikaan
- Latino/a, Hispanic, ama Isbaanish
- Bariga Dhexe
- Ameerikaan Dhalad ah iyo/ama Alaska Native
- Native Hawaiian iyo/ama Jaziirada Baasifiga
- Slavic
- Caddaan ama Caucasian
- Kuwo kale: _____
- Waxaan doorbidayaa inaan ka jawaabin

